Somaliska
Trygga människor vågar

Qofka ku nool reynreyn wuxuu muujiya dhiirigelin

17ka sebteembar oo ku aadan maalinta doorashada, waxaa go'aan laga gaari doona mustaqbilka dalka Iswiidan, xilkaasuna wuxuu saaran yahay adiga iyo aniga ba. Dhammaanteenna waxaa dusha naga saaran isla xilkaas. Codkaaga iyo kayga waa isku qiimmo. Haddaba miyaan kor u qaadna horumarka heerka sare ah, mise hoos ayaan u dhigna, anagoo karoonka shanaad ee canshuurta ka saarno khasnadda aanu wadajirka u leenahay? Miyaan horumarinaa hab-noleedka dalka Iswiidan – mise dusha ayaan u dhignaa?

Qof kasto wuu xannuunsan karaa mise shaqolaawe ayuu noqon karaa. Qof kasto wuu gabooba, kolkolna tirada xubnaha qoyska sare ayee u kacda. Sidaas awgeed, ummadda dalka Iswiidan waxay lee yihiin caymiska wadajrka ah. Kuwaaso ummada dhaqaalae ahaan ka caymiyaa haddii ay dhacdo dhaqaalexummo. Sida markii aanu lahayn awooda shaqada, taaso u sabab ah shaqo la'aan, jirro, dhawaac shaqada ama annu qasbanahay in an daryeelsinno carruurta yaryar ee xannuunsan. Nolosaha waa is bedbedesha, kolkolna isbedeladaas waxay keenta baahida taageerada dheeraadka ah.

Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga, raali kama nihin in qof lagu dirqiyo innuu aqalkiisa iibiyo kadib markii u ku dhaco cudur ama la ciribtiray warshadii u ka shaqayn jiri. Sidaaso kale raali kama nihin in da'yar lagu dirqiyo innuu joojiyo dhaqdhaqaaqyadii berri hore u ku dhaqaaqi jiray, taaso u sabab ah waalidkiisa oo xannuunsaday ama noqday shaqolaawe. Sidaas awgeed ayaa loogu baahan yahay caymisyo cadaalad ku salaysan, kuwaaso dadweynaha hab buuxda ugu badbaadiyaan haddii ay xannuunsadaan, shaqolaawe noqdaan, ku dhawaacmaan shaqadooda ama ay qaataan fasaxa waalidiinta. Caymisku wuxuu abuura badbaadin, kaaso qof kasto uu ka faa'iideysan karo, xitaa qoyska oo idil. Waxay kalo suurtageliyaan

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah mise aad dooneeyso inaad xubin ka noqoto xisbig aocialdemokratiga, booqo hoyga Internetka ee socialdemokratigana.se mise wac taleefanka 08-700 27 27

muruqgelinta tababarro cusub, bedelaada hoyga, dhisida qoyska ama asaaska shirkada. Waa arrin dadweynaha dhammaantood ka faa'iideysan karaan. Qofka ku nool reynreyn wuxuu muujiya dhiirigelin.

Hab-dhiska siyaasadayda waxay tahay in markiii an shaqo haysano oona caafimaad qabno, an midnimmo u muujinno kuwa markaas nogu liito oo baahan taageerada bulshada. Markii an caafimaad qabno oona shaqo haysano, waxaan bixinaa qayb daqligayga kamid ah oon ku shubnaa khasnadda caymiska wadajirka, kaaso taageero an ka heli doono haddii/markii noloshayda wax iska bedesho – sida shaqo la'aan ama jirrada ay jirto. Sidaas ayuu dalka Iswiidan ku noqonayaa dal midnimmo ku dhisan, ummadda dhamaantoodana waxay helayaan badbaadinta ay awoodaan.

Caymisyada badbaadinta leh waxay ummadda dalka ku nool ku abuurta xaalad badbaadin, xoog iyo dhiirigelin leh. Dalka Iswiidan waxaan wadajir ka dhigi karnaa dal adduunweynaha tartan sare la gelo karo, oona ka tirsan bulsha adduunka. Taaso ah saldhigga heerka noloshayda ee heerka sare ah iyo horumarkayga wanaagsan. Badbaadinta iyo horumarka shaqsiyeedka waxay keenta horumarka qarmeed ee wanaagsan. Caymisyada badbaadinta waa qodob muhim u ah siyaasadda horumarka wanaagsan ee dalka Iswiidan. Waxay keenaaan badbaadin, waxayna abbuuraan saldhigga horumarka iyo helida shaqada cusub.

Wax ku bediladeeda
Qodobka oo an aaminsan nahay oo ah in qofka ku nool reynreyn uu muujiyo dhiirigelin waxaa ka soo horjeeda siyaasadda isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo, kuwaaso aaminsan in "bahal duureedka baahan u xariif ku yahay ugaarsashada". Xisbiga moderaterna wuxuu doonayaa innu hoos u dhigo heerka habdhiska badbaadinta, iyadoo hoos loo dhigo heerka magdhowga, hirgelinta caymiska-na lagu biiriyo maalin dheeraad ah. Teeda kale, iyaga raali kama aha in sare loogu qaado heerka magdhowga ugu sareeyo.

Taaso keeni doonto hoos u dhigida heerka magdhowga shaqolaaweyada, magdhowga la siiyo waalidiinta fasaxa waalidiinta qaatay, bukaanada, kuwa shaqada ku dhaawacma ama ama kuwa qaata magdhowga daryeelka carruurta xannuunsan. Bukaanno iyo shaqolawe tiro badan ayaa maanta xaalad-dhaqaaleed xun ku nool. Haddba su'aasha waxay tahay, sidee bu qofku u shaqo raadsan karaa, haddii magdhowga shaqolaaweha ama bukaanka aad xannuunsan hoos loo dhigo, xaaladaas oo qoyska ku khasbin karto in aqalka laga xaraasho.?

Xisbiga moderaterna waa xisbii doonayaa in uu mushaharada hoos u dhigo. Iyadoo hoos loo dhigo magdhowga khasnadda shaqlaaweyada ay bixiso iyo magdhowga caymiska bukaanada, waxayo doonayaan in ay abuuraan suuq shaqo oo mushahar hooseeyo la bixiyo. Qofka xannuunsan ama shaqolaweha ah ayaa la siinayaa magdhow aad u

hooseeyo, sidaasna lagu dirqiyo innuu raadsado shaqo mushaheerkeeda hooseeyo, kaaso ku filnayn nolol-maalmeedka. Taaso iyada-na hoos u dhigi doonto mushaharrada oo idil. Waa siyaasad abuuri doonto goobaabin xun. Haddii ummadda dhammaantood ay qaataan mushaharro hooseeya waxaa hoos u dhacaayo awooda ganacsiga, sidaas-na waxaa hoos u dhici doono awood dhaqaaleedka qaranka.

Haddaba mushahar hoos u dhigida ma habka saxa ah ee dalka Iswiidan u suuqa adduunka kula tartami karo? Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga waxaan aaminsan nahay aqoon iyo karti-xirfadeed, ee kuma qanacsan nihin mushahar hoos loo dhigo iyo reyreynxummo. Guusha siyaasadda xisbiga socialdemokratiga waxaa lagu muujiyay in dalka Iswiida u yahay dalka dalalka Isbahaysiga Yurub ugu dhaqaale roon, iyo in heerka nolosha ee dalka Iswiidan u kolba sare u sii kacaayo, iyo in horumarka dhaqaaleed ee dalkayga u ka mid yahay kuwa adduunka ugu wanaagsan.

Caymisyada badbaadinta waa qodob muhim ah ee lagu macnayno karo guusha dalka Iswiidan iyo qayb muhim ah ee siyaasadda horumarka leh ee dalka Iswiidan. Waxay keenta badbaadin. Waxay ku dhisan tahay midnimo. Waxay keenaan saldhigga korniinka dhaqaalaha qarmeed, horumarka iyo shaqo cusub.

Dalka Iswiidan anagu aanu maamuli doono waa loo dhan yahay, adigu-se dalkee dooratay?